

Tiibisho jiifta, warbixin bukaan (2016-09-19)

Goormee daweyn ka hor tag la bixinayaa.

Warqadda warbixinta ee dhakhaatiirta ka gaashaamashada cudurrada faafa.

Sidee qofku ku noqdaa mid la qaadsiiyay?

Bakteeriyada tiibishadu waxaa ay ku faaftaa hawada iyadoo qof ka imaaneyso qofna geleysa. Taasi waxaa ay dhici kartaa marka kan xanuunsan oo wax qaadsiiin kara uu qufaco, dadka agtiisa joogana ay neef ahaan u jiitaan bakteeriyada.

Waa maxay tiibisho jiifta?

Dadka la qaadsiiyo oo dhan ma ku xanuunsadaan tiibiisho. Dadka badankooda awooddooda difaaca jirka ayaa joojin karta koritaanka bakteeriyada. Bakteeriyadu jirka way iskaga jiri kartaa iyada oo aan firfircooneyn. Xaaladdan ayaa loogu yeeraa **tiibisho jiifta**.

Tiibisho jiifta maaha wax cudur ah.

Adigaaga baaritaan dhiig ka dib (tijaabada IGRA) ama tijaabo maqaar (tijaabo tiibisho) helay jawaab ah in aad qabtid tiibisho jiifta **si buuxda ayaaad u caafimaad qabtaa**, dad kalana kuma faafin kartid bakteeriyada. Waxaase jirta khatar ah in waqti dambe oo nolosha ka mid ah ay isu beddeli karto cudur tiibisho, laakiin khatartaasi waa ay yartahay. Sidaas darteed badanaa looma baahdo in la siiyo wax daweyn ah kuwa qaba tiibishada jiifta.

Daweyn ka hor tag mararka qaar waa la bixiyaa

Dadka qaar ee khatarta ugu jira in ay waqti dambe ku xanuunsadaan ayaa caadi ahaan la siiyaa daweyn ka hor tag ah. Marka ugu horreysa taas waxaa ay khuseysaa carruurta iyo dhallinyarada, marka uur la leeyahay iyo dhalidda ka dib iyo dadka leh difaac jir oo liita, tusaale ahaan marka kansar leyska daweeyo, dadka sokorta qaba ee insuliinka lagu daweeyo, cudurro kilyo oo adag. Daweyn ka hor tag ah waxaa mararka qaar la siiyaa xitaa dadka dhawaan la qaadsiiyay tiibishada.

Waxaa laguugula talinayaa daweyn ka hor tag ah

Maadaama aad qabtid tiibisho jiifta oo aad ka tirsantihid mid ka mid ah kooxaha la soo sheegay waxaa laguugula talinayaa daweyn looga gol leeyahay ka hor tag: Taasi waxaa ay yareneysaa khatarta ah in mustaqbalka tiibisho aad la xanuunsatid.

Macluumaadka xiriirka (*Kontaktuppgifter*)

Magaca rugta qaabilaadda (*Namn på mottagningen*)

.....

Cidda aad la kulantay (*Du har träffat*)

..... Dhakhtar (*Läkare*)

..... Kalkaaliso caafimaad (*Sjuksköterska*)

Nambar taleefan/waqtiga taleefanka ee rugta qaabilaadda (*Telefonnummer/telefonid till mottagningen*)

.....